

Hel caawimaad ku aadan dhibaatooyinka khamriga iyo isticmaalka daroogada

Minnesota waxay leedahay noocyo badan oo ah daawaynta dadka la dhibaataysan isticmaalka khamriga iyo daroogada. Waa muhiim inaad ogaato nooca adeegyada isticmaalka maandooriyaasha ee ugu haboon dedaalkaaga soo kabashada.

+ Sidee ayaan u go'aamin karaa haddii aan u baahan nahay daawayn iyo noocyada adeegyada aan helaayo?

Mar qiimayn balaaran si loo go'aansho noocyada adeegyada ee kuugu haboon. Kani waa qiimayn uu sameeyo la taliyaha joojinta khamrada iyo daroogada kaasoo go'aaminaaya nooca daawaynta ee uu u baahan yahay qof isticmaala maandooriyaasha.

+ Xagee ayaan ka helayaa qiimaynta balaaran?

Si aad u hesho adeeg bixiyaasha deegaankaaga, booqo mid kamid ah lifaaqyada soo socda.

- [FastTracker](#): Webseedkaan wuxuu kaa caawinaaya inaad hesho adeegyada xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha. Waxay sidoo kale ku siinaysaa liiska adeeg bixiyaasha qabiilka iyo kuwa ka baxsan gobalka.
- [Galka Macluumaadka Shatiyeynta DHS](#): Kani waa kaydka xogta ee dhammaan barnaamijyada ay ruqsada siisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Doorro nooca ruqsada daawaynta isticmaalka maandooriyaasha si aad u hesho adeeg bixiyaasha. Kaydka xogta waxaa sidoo kale ku jira xogta dib u eegista lagu sameeyay ruqsadaynta.
- [Kaydka Adeeg bixiyaasha ee Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota \(MHCP\)](#): Kaydkaan waxaa ku jira liiska adeeg bixiyaasha daryeelka caafimaadka ee u adeegga xubnaha macamaisha MHCP (sida Medical Assistance iyo MinnesotaCare).

+ Sidee ayaan ku dhiibayaa qarashka qiimaynta balaaran?

Haddii aadan haysan caymis, ama haddii aadan haysan caymis kugu filan, wac [Xafiiska degmadaada ama qabiilka \(PDF\)](#) si aad u waydiiso haddii aad u qalanto caawimaad dhaqaale oo kaa caawinaysa adeegyada daawaynta xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha, sida baaritaanka balaaran. [Waxaad u qalmi kartaa maalgelin ayadoo ku xiran heerka dakhligaaga.](#)

Haddii aad haysato caymis caafimaad, la xariir shirkadaada caymiska si aad u ogaato noocyada faa'iidooyinka aad helayso aadna u hesho adeeg bixiyaal ku caawin kara. Dadka haysta caymiska Medical Assistance ayaa heli kara lambarada taleefanka adeegyada macaamiisha qorshaha caafimaadka oo ku qoran webseedkaan [lambarada taleefanka adeegyada macaamiisha ee qorshaha caafimaadka.](#)

OGOW: Si aad u hesho xogta xariirka ee adeegyada macaamiisha ee shirkadaha caymiska ee taageeraaya qorsheyaasha MA

Adeegyada daawaynta

Adeegyada xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha waxaa kamid ah:

- Qiimayn ballaaran
- Adeegyada daawaynta ee aan dadka la seexin (bukaan socod) ee shaqsiyaadka iyo kooxaha
- Adeegyada daawaynta ee dadka la seexiyo
- Daawaynta Bukaan Jiifka ee isbitaalka lagu baxsho
- Xakamaynta xanuunka ka dhasha jooginta maandooriyaha ee lagu baxsho xarunta la seexo
- Baxnaaniyaasha daawada lagu taageero (tan waxaa ku jira barnaamijyada daawaynta opioid oo baxsha daawooyinka methadone iyo baxnaaninta kale, iyo adeeg bixiyaasha xarumaha leh ee dadka u qora daawooyinka lagu daaweeyo xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha)
- Iskudubaridka daawaynta
- Taageerada soo kabashada ee dadka isku xaalada ah baxshaan.

Xog badan ka ogoow

- Hel xog dheeraad ah oo ku saabsan [u qalmida adeegyada daawaynta ee bilaashka ah](#).
- Hel xaqiiqooyin ku saabsan xanuunka laga qaado isticmaalka maandooriyaasha adoo booqanaaya [webseedkeena su`aalaha Inta badan la Isweydiyo](#).
- Raadi nooca [caawimaada loo helo dhibaataada khamaarka](#).